# FASAXA MUSHARKA LEH EE MINNESOTA

**Laga bilaabo** Janaayo 1, 2026

**Fasaxa Musharka leh ee Minnesota wuxuu bixiyaa lacag iyo ilaalinta shaqada marka aad u baahato inaad qaadato waqti fasax ah si aad isugu daryeesho naftaada ama qoyskaaga.**

## Maxaan oogu isticmaali karaa Fasaxa Musharka leh?

### Fasaxa Caafimaadka:

- Si aad isugu daryeesho xaalad caafimaad oo halis ah oo kuu gaar ah, oo ay ku jirto daryeel la xiriira uur, dhalmo, iyo soo kabasho

### Fasaxa Qoyska:

- **Fasaxa Is-xirnaanta** – si loo daryeelo loona xirmo ilmo cusub oo lagu soo dhoweeyay qoyska iyadoo loo marayo dhalasho, korsasho, ama meeleyn la xannaaneynayo
- **Fasaxa Daryeelka** – si loo daryeelo xubin qoyska ka tirsan oo qaba xaalad caafimaad oo halis ah
- **Fasaxa Qoyska Milatari** – si loo taageero xubin qoyska ka tirsan oo loo yeeray inuu galo adeeg firfircoon
- **Fasaxa Badbaadada** – si looga jawaabo arrimo la xiriira tacaddiga guriyeed, kufsiga, ama daba-galka adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsan

Guud ahaan, xaaladuhu waa inay socdaan in ka badan toddoba maalmood, waxaana ay u baahan yihiin in la caddeeyo iyadoo la marayo bixiyaha daryeelka caafimaadka ama xirfadle kale.

## Ma u qalmaa Fasaxa Musharka leh?

Shaqaalaha intooda badan ee Minnesota waxay u qalmaan Fasaxa Musharka leh. Waxaad u qalantaa Fasaxa Musharka leh, iyadoon loo eegin inta uu weyn yahay shaqo-bixiyahaaga, ama tirada saacadaha ama maalmaha aad shaqeyso.

Qandaraaslayaasha madax-bannaan iyo dadka iskii isu shaqeysta si toos ah looguma daro barnaamijka, balse way iska dooran karaan inay ka qeybqaataan. Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto lacag-bixinta haddii aad sanadkii tegay ka shaqeysay Minnesota oo aad heshay ugu yaraan $3,900 (tusaale ahaan, si loogu qalmo Fasaxa Musharka leh sanadka 2026).

## Intee ayan fasax qadan karaa?

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto illaa 12 isbuuc oo fasax qoys ama caafimaad ah sannadkii faa'iidada. Haddii aad u baahato fasax qoys iyo caafimaad labadaba isla sannadka faa'iidada, waxaad u qalmi kartaa illaa 20 isbuuc guud ahaan.

## Imisa lacag ah ayaan heli doonaa?

Marka aad isticmaasho Fasaxa Musharka leh, dowladda gobolka ayaa ku siin doonta lacagta. Fasaxa Musharka leh wuxuu dabooli karaa ilaa 90% mushaharkaaga, iyadoo lagu saleynayo heerka dakhligaaga, iyadoo sidoo kalena lagu xadidayo qaddarka ugu badan ee toddobaadlaha ah ee celceliska mushaharka gobolka. Qaddarkaasi wuu isbedelaa sannad kasta, wuxuuna noqonayaa $1,423 marka la bilaabayo Fasaxa Musharka leh ee 2026.

## Yaa bixiyaa kharashka Fasaxa Musharka leh?

Fasaxa Musharka leh waxaa lagu maalgeliyaa lacagta caymiska (premium) ee ay bixiyaan shaqaalaha iyo shaqo-bixiyeyaasha. Heerka bilowga ah ee lacagta caymiska waa 0.88% mushaharka la caymiyay. Shaqo-bixiyahaagu wuxuu ka jari karaa ilaa 0.44% mushaharkaaga si uu u daboolo qaybtaada ka mid ah lacagta caymiska.

## Maxay yihiin ilaalinta shaqada ee aan leeyahay?

- **Ilaalinta shaqada**: Guud ahaan, waa in lagugu soo celiyo shaqadaadii ama boos u dhigma marka aad fasaxa ka soo laabato. Ilaalinta shaqada waxay dhaqangalaysaa 90 maalmood ka dib taariikhda laguu shaqaaleysiiyay.
- **Sii wadidda caymiska caafimaadka**: Guud ahaan, shaqo-bixiyeyaashu waa in ay sii wadaan bixinta qaybtooda caymiska caafimaadka inta aad fasaxa ku jirto.
- **Ma jiri karo aargudasho ama faragelin:** Shaqo-bixiyeyaashu waa inaysan kaa hor istaagin ama kugu aargudan haddii aad codsato ama isticmaasho Fasaxa Musharka leh. Shaqo-bixiyuhu ma qaadan karo lacagaha Fasaxaaga Musharka leh.

Wixii su'aalo ah ee la xiriira Fasaxa Musharka leh, fadlan la xiriir Minnesota Paid Leave adigoo wacaya 651-556-7777 ama booqo mareegteena.

Haddii aad u maleyneyso in shaqo-bixiyahaagu uu jebinayo xuquuqdaada shaqo, la xiriir Waaxda Heerarka Shaqada ee Wasaaradda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota.

**WAXBADAN KA OGOW:** paidleave.mn.gov

Macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kale oo loogu talagalay dadka naafada ah ama dadka u baahan kaalmo luqadeed, adigoo wacaya Xarunta Xiriirka ee Fasaxa Musharka leh: 651-556-7777 ama 844-556-0444 (wacitaan bilaash ah).

MINNESOTA PAID LEAVE

Minnesota Paid Leave | 180 E 5th St Suite 1200 | Saint Paul, MN 55101

7/2025